

Xeer Sharcidejiye L. 2 ee 22 Oktoobar 1960

Qoritaan Saraakiil Xoogga Dalka

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Markuu arkay sharciga 6 Abiriile 1960, lamba. 15;

Markuu arkay X. Sh. 4 Maajo 1960, lamba. 5;

Markuu Aqoosaday fursadda, xagga wixii la xiriira Qod. 4aad, sharciga horey loo soo xigtay, ee 6 Abiriile 1960, lamba. 15 iyo faqradda ugu dambaysa, ee Qod. 1aad, ee X. Sh. (Xeer Sharcidejiye) 4 Maajo 1960. lamba. 5, in la soo saaro xeerar la xiriira qorista saraakiisha Xoogga Dalka;

Markuu dhegeystay Golaha Wasiirrada;

Soojeedinta Wasiirka Difaaca.

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1

Saraakiisha Xoogga Dalka waxaa la ciidan-qorayaa ayada oo ikhtiyaari ah, Waxaana lagu soo bandhigayaa tartan furan.

Ciidan-qoristaas waxaa loo sameynayaa ayada oo lagu sameynaya saldhig waddani ah.

Qod. 2

Ciidan-qorista ikhtiyaariga, ee ku xusan Qod. hore, waxaa hollin kara muwaadiniinta soomaaliyeed oo:

- 1) — ku jira xadka dáda uu dhigayo qoraalka lagu soo bandhigo tartan kasta;
- 2) — ah kuwo hbuuxiyey shuruudaha dhismo jir ahaaneed oo laga dalbaayo,, sí waafaqsan góaanka Guddigyada Dhakhtar Sharci oo uu hadba magacaabo Wasiirka Difaaca;
- 3) — ah kuwo leh habdhaqan wanaagsan oo akhlaaq iyo bulshadeed;
- 4) — aan horey loogu xukumin ciqaab xarig oo la xirira dembiyo ula-kaca;
- 5) — aan ahayn kuwo horey loogu shaqada looga ruqseeyey sababo asluubeed oo la caddeeyey ama shaqo looga fasaxay dhantaalan xagga jirka oo weli jirta, Ciidan, Ciidan qalab sida, ee Dowladda.

Qod. 3

Qoraallada bandhigidda tartanka oo lagu soo saaro Xeer Madaxweyne, ayada oo laga ambaqaadayo soojeedinta Wasiirka Difaaca, lana dhegeystay Golaha Wasiirrada, waa in ay tilmaamaan:

- 1) — nooca ciidan qorista iyo tirada jagooyinka la geliyey tartanka;
- 2) — qaybta jagooyinka loo gaar yeelay dhallinyarada ka imanaysa nolosha bulshada rayidka iyo qabta loo gaar yeelay militariga horey shaqada ugu jiray oo ka tirsan qaybaha Xoogga iyo leyliga Dugsiga Militariga;
- 3) — xeerarka ka-qaybgalkatartanka iyo shuruudaha looga baahan yahay;
- 4) — habka hubinta shuruudaha la dejiyey;
- 5) — Wixii macaayiir ah oo loogu kala hormarayo qorashada ciidanka (ciidan-qorashada);
- 6) — muddada ay soconayaan koorisyada;
- 7) — dhaqaalaha la bixinayo inta ay socdaan koorisyada;
- 8) — tilmaan kastoo kale oo wax ku ool ah;

Qod. 4

Xulista ka-dhursugayaasha waxaa lagu sameynayaa (fulinayaa) góaan aan laga doodi karin, ee guddi, ee uu hadba mar magaacaabo Wasiirka Difaaca, ka kooban sidan:

- Janan ah taliyada Ciidanka Xoogga Dalka – Guddoomiye;
- Madaxa abbaan-duulka Xoogga Dalka - Xubin;
- Sarkaal sare, ee ciidanka Xoogga Dalka - Xubin;
- Dhakhtar hoggaan ka ah adeegyada caafimaad, ee Ciidanka Xoogga – Xubin;
- Sarkaal hoose, ee ciidanka xoogga Dalka. - Xoghaye.

Qod. 5

Ku-guuleystaasha tartanka (oo aan horey ugu tirsaneyn militariga) waxaa loo qorayaa Xoogga Dalka xagga inta ay socoto hakinta ku tilmaaman qoraalka lagu soo bandhigay tartanka, ayaga oo qaadaya dhammaan waajibaadka ka imanaya xaaladda cusub, sida ay qabaan sharciyada iyo xeerarka militari.

Muqdisho, 22 Oktoobar 1960.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda

Aadan Cabdulle Cusmaan

Wasiirka Kowaad

Cabdirashiid Cali Sharmarke

Wasiirka Difaaca

Maxamed Ibraahin Cigaal

Waa arkay waana Diiwaangeliyey –

Diiw. lamba. 2, Xaashi lamba. 192.

Muqdisho, 8 Noofember 1960

Hantidhowraha: **Axmed Dahir**